



Tilmaamaha Farshaxanka Dhallinyarada ee 2026

Guudmarka Deeqda

Deeqda Farshaxanka Dhallinyarada (Youth Arts grant) waa barnaamij soconaya 2 sano oo ka caawiya ardayda dugsiyada dhexe iyo sare ee Seattle inay helaan fursado badan oo farshaxan iyo dhaqan ah. Barnaamijyadani waxay dhacaan waqtiyada ka baxsan saacadaha dugsiga, waxaana hoggaamiya farshaxanlayal xirfad leh iyo farshaxanlayal waxbarayaal ah. Ujeeddadu waa in la abuuro fursado badan ee dhallinyarada ka kala yimaada asalo kala duwan oo jinsiyadeed iyo dhaqaale ay kaga qayb karaan farshaxanka.

Haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan arrimo sida codsashada, hubinta haddii aad u qalanto, ama isticmaalka nidaamka deeqda onlaynka ah, fadlan iimayl u dir: YouthArts@seattle.gov.

Waxaan noo jooga turjubaano kugula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Kaliya na soo wac oo noo sheeg luqadda aad ku hadasho. Fadlan sug qaddar yar inta aanu raadineyno turjubaan ku soo biira wicitaanka. Sidoo kale waxaad iimayl noogu soo diri kartaa YouthArts@seattle.gov si aad u ballansato kulan.

Codsiga (Arjiga)

[Ku Codso qaabka khadka](#) iyadoo la adeegsanayo bogga deeqaha ee Magaalada Seattle.

Haddii aadan haysan kumbiyuutar ama internet, fadlan la xiriir shaqaalaha sida ugu dhaqsaha badan.

Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

Tuesday, March 10, 2026, 5 p.m. Pacific.

Fadlan u ogolow wakhti ku filan markaad buuxinayso codsigaaga (arjigaaga). Codsiyada la soo gudbiyo kadib 5:00 galabnimo ee waqtiga Pacific lama aqbali doono.

U-qalmitaanka

- Mashruucyadu waa inay dhacaan inta u dhexeysa Sebtembar 2026 – Agoosto 2027 iyo Sebtembar 2027 – Agoosto 2028.

- Codsadayaasha u qalma waxaa ka mid ah farshaxanno shaqsi ah, farshaxanno waxbarayaal ah, ururrada farshaxanka iyo dhaqanka, hay'adaha adeegga dhallinyarada, iyo hay'adaha bixiya shahaadooyin waxbarasho.
- Barnaamijyadu waa inay u furnaadaan dhallinyarada da'da dugsiga dhexe iyo/ama dugsiga sare, isla markaana waa inay ka dhacaan gudaha xuduudaha magaalada Seattle. La hadal maamulaha mashruuca haddii aad qabto su'aalo.
- Cinwaankaaga asalka ah wuxuu noqon karaa mid ka baxsan xuduudaha magaalada Seattle.
- Dhammaan farshaxanlayasha iyo farshaxanlayasha waxbarayaasha ah ee ay shaqaaleeyaan kuwa la siiyo deeqda waa inay leeyihiin ugu yaraan hal (1) sano oo waayo-aragnimo ah oo ay kula shaqeeyeen da'da mashruuca iyo noocyada farshaxan iyo/ama dhaqan ee la xiriira.
- Mashruucyadu waa inay ka tarjumaan mudnaanta iyo tirakoobka deeqda farshaxanka Dhallinyarada sida kor ku xusan ee ku qeexan **Dulmarka Deeqda**.

Maalgelinta

Kuwa la doorto ee la siiyo deeqda waxay heli doonaan guud ahaan **\$12,000** oo taageero maaliyadeed ah, taas oo lagu bixin doono laba (2) sano oo barnaamijyo ah: \$6,000 sanadka 2026–2027 iyo \$6,000 sanadka 2027–2028.

Kulamada Macluumaadka

Wax badan ka baro deeqdan iyo sida loo gudbiyo arjigaaga ugu wanaagsan. Ka qaybgal mid ka mid ah kulamada xog-bixinta si aad uga hesho jawaabo su'aalaha gaarka ah ee ku saabsan mashruucaaga.

Kulan Su'aalo iyo Jawaabo 1

Thursday, Feb. 12, 2026, 12 – 1 p.m.

[Xaqiiji ka-qaybgalka \(RSVP\) illaa Febraayo 12](#)

Kulan Su'aalo iyo Jawaabo 2

Tuesday, Feb. 17, 2026, 5 – 6 p.m.

[Xaqiiji ka-qaybgalka \(RSVP\) illaa Febraayo 17](#)

Casharka 1 dib u eegista qabyada ah

Wednesday, Feb. 25, 5 – 6 p.m.

[Xaqiiji ka-qaybgalka \(RSVP\) illaa Febraayo 25](#)

Casharka 2 dib u eegista qabyada ah

Tuesday, March 3, 12 – 1 p.m.

[Xaqiiji ka-qaybgalka \(RSVP\) illaa March 3](#)

